

**GUDDIGA KU-MEEL GAARKA AH EE DOORASHOYINKA
DAWLADDA PUNTLAN EE SOOMAALIYA**

WARBIXINTA SANNADKA 2021

May, 2022



TUSMADA WARBIXINTA

TUSMADA WARBIXINTA	i
GUDDIGA KMG DOORASHOYINKA PUNTLAND.....	ii
KALMADDA GUDDOOMIYAHA	iii
HORDHAC	iv
WARBIXIN-SANNADEEDKA 2021	1
1. XEERARKA IYO HABRAACYADA DOORASHOYINKA	1
2. DOORASHADA DEGMOOYINKA HORDHACA AH	2
2.1. Qalabka diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha.....	2
2.2. Sahminta Goobaha Diiwaan-gelinta iyo Seejooyinka Doorashada	3
2.3. Wacyi-galinta iyo tababarrada	3
2.4. Tababarrada hawl-wadeenada diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha	4
2.5. Diiwaan-gelinta cod-bixiyaha	4
2.6. Shaacinta Liiska cod-bixiyeyaasha hordhaca ah	4
2.7. Shaacinta liiska cod-bixiyeyaasha Rasmiga ah.....	5
2.8. Daabacaadda iyo qaybinta kaararka cod-bixiyeyaasha	5
2.9. Liisaska musharixiinta degmooyinka.....	6
2.10. Ololaha doorashada.....	7
2.11. Diyaar-garowga guud ee maalinta codeynta.....	8
2.12. Maalinta cod-bixinta.....	9
2.13. Tirinta codadka iyo ku dhawaaqidda natiijada.....	9
3. KA QAYBGALKA HAWEENKA.....	14
4. URURADA SIYAASADDA.....	14
5. AMNIGA.....	15
6. KORJOOGTADA DOORASHADA	15
7. CAQABADIHII LAGA BARTAY DOORASHADII HORDHACA AHAYD	16
8. CASHARADII LAGA BARTAY DOORASHADII HORDHACA AHAYD	16
9. MILICSIGA DOORASHADA.....	17
10. GUNAANAD MAALIYADEEDKA 2021	18
11. HAWL-QABADYADA QORSHAYSAN 2022	20
LIFAAQA 1-AAD: SAWIRADA 2021.....	21
LIFAAQA 2-AAD: BAHWADAAGTA GKDPL.....	23
LIFAAQA 3-AAD: LIISASKA SEEJOOYINKA COD-BIXINTA.....	24
LIFAAQA 4-AAD: LIISKA COD-BIXIYEYAASHA KAMA DANBAYSTA AH	25
LIFAAQA 5-AAD: XOGTA NATIIJADA DEGMOOYINKA	29



GUDDIGA KMG DOORASHOYINKA PUNTLAND

Guddiga KMG Doorashooyinka Puntland (GKDPL) oo ah guddigii 3aad waxaa si rasmi ah u ansixiyay Baarlamaanka Puntland 16-kii November 2019, waxaana loo aasaasay qabashadda shaqooyinkan soo socda oo kala ah: u-samaynta siyaasadda, maamulidda iyo qabashadda doorashooyinka dowladaha hoose, diiwaan-gelinta ururadda siyaasadda, diiwaan-gelinta muwaadiniinta codeyn kara, diiwaan-gelinta iyo shahaadasiinta saddexda urur siyaasadeed ee ku guuleysta kadib qabashadda doorashoyinka dowladaha hoose iyo dhameystirka dhammaan shaqooyinka kor ku xusan. Guddiga KMG doorashooyinku waxuu jidka u sii xaarayaa Guddiga rasmiga ah ee doorashooyinka Puntland.

Guddiga Doorashooyinka KMG ee Puntland wuxuu ka kooban yahay 9 xubnood oo ay hogaaminayaan Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenkiisa iyadoo loo xil saaray jihatya siyaasadda iyo korjoogtaynta istiraatiijiga ah. Waxay ansixiyaan siyaasadaha, qawaaniinta, xeerarka anshaxa iyo tilmaamaha ku socda xoghayaha guud, agaasimayaasha, howl-wadeenada xarunta dhexe iyo masuuliyiinta doorashooyinka kumeel gaarka ah ee gobolada, degmooyinka, goobaha diiwaan-gelinta iyo cod-bixinta.

Tan iyo sharciyad sinntiisii ka dib, Guddigu wuxuu dhaqan galiyay waajibaadkii loo igmaday oo ay ka mid ahaayeen diyaarinta, abaabulka iyo kormeerka doorashooyin xor iyo xalaal ah oo ka dhaca deegaannada Puntland iyo u soo gudbinta cod-bixiyeyaasha natiijada dhabta ah ee doorashada taasoo ka maran eex iyo wax isdaba-marin. Guddigu wuxuu hirgaliyay doorashada 3dex dagmo (Qardho, Eyl iyo Ufayn) oo hordhac ah loogana gol-lahaa in laga barto casharo gogol-xaar u noqda laguna dabakho doorashada degmooyinka kale. Guddigu wuxuu u heellan yahay inuu guto waajibaadka loo igmaday iyadoo ay hagayaan mabaadi'da Dimuqraadiyadda sida; Madax-bannaanida, Eex la'aanta, Kawada qayb-qaadashada, Daah-furnaanta iyo Isla-xisaabtanka iyadoo uu guddigu qorshaynayo inu sanadkaan 2022 ku soo afmeero dhammaan doorashooyinka dawladdaha hoose.



KALMADDA GUDDOOMIYAHA



BISMILLAAH,

Ugu horayn waxaan si weyn ugu mahadcelineyaa dhammaan cid kasta oo nagala qaybqadatay gacan muuqata iyo mid dadbana ka gaysatay doorashadii hordhaca ahayd ee ka qabsoontay degmooyinka Qardho, Eyl iyo Ufayn 25-kii, okotoober 2021 taas oo ku soo dhammaatay guul ayna soo dhaweeyeen Shacbiga Puntland, Umadda Somaaliyeed iyo bulshada caalamka. Anagoo qorshaynayna inaan u gudubno wajiga xiga ee doorashada guud waxaan jeclahay in aan qiroy hawl-karnimadooda una mahad celiyo Ururada Siyaasadda Puntland oo tacab iyo waqtiba galiyay, Xukuumadda Puntland, Bulshada Rayidka ah, deeq-bixiyeyaasha iyo hawl-wadeenadii heerarka kala duwan lahaa ee ka shaqaynayay doorashadii hordhaca ahayd.

Dhammaanteen waxaan ku soo shaqaynay marxalado adag sida; Caabuqa Covid-19, Abaaro ba’an oo ka jiray degmooyinka doorashada hordhaca ah loo asteeyay, doorashada federaalka oo marar badan cadaadis saartay jadwalkeena doorasho iyo dhaqaalaha oo naguyaraa. Inkastoo caqabadahaas jireen hadana waxaan gaarnay guul wayn oo wax ku ool ah maadaama ay doorashadii ugu horaysay abid oo qof iyo cod ahi inooga qabsoontay saddex degmo oo hordhac u ah degmooyinka Puntland. Waxaan hantiday khibrad maadaama uu inoo dhammaystirmay hal wareeg doorasho kaas oo aan ka baranay casharro wax ku ool ah.

GKDPL waxa uu u diyaar-garoobayaa doorashooyinka guud ee Dawlaha Hoose, taasoo ka hawl-badan, kana baahsan wareegii hore ee doorashadii hordhaca ahayd, wuxuuna soo bandhigayaa jadwalka doorashada degmooyinka haray, qorshaha guud ee hawl-gallada diwaangelinta cod bixiyaha, maalinta cod-bixinta, iyo Qorshaha Istaraatiijiyada Wacyi-gelinta Cod-bixiyayaasha Puntland ee 2022. Iyada oo la raacayo Tubta Doorashooyinka iyo Qorshe hawleed yadaan, GKDPL waxa uu fulin doonaa hawlaha muhiimka ah sida; dhammaystirka xuduudaha deegaan doorashooyinka degmooyinka haray, diiwaan-gelinta cod-bixiyeyaasha, wacyi-gelinta muwaaddiniinta iyo wax barista cod-bixiyayaasha, qabashada doorashooyinka guud ee degmooyinka haray, abaabulka kormeerka iyo ka warbixinta natiijooyinka doorashooyinka iyo shahaada siinta saddexda xisbi ee ku guulaysta doorashooyinka Dawladaha Hoose.

Ugu danbayn waxaan ka codsanayaa kuna dhiirigelinayaa dhammaan shacabka Puntland ee sharafta leh in ay ka qaybqaataan hanaanka doorashada dowladaha hoose sida wacyi-gelinta, is-diiwaan-gelinta, musharaxnimada, isu-soobaxyada olalaha iyo codaynta.

Wabillaahi Tawfiiq.

C/RISAAQ AXMED SICIID

Guddoomiyaha GKDPL



HORDHAC

Warbixintan waxaa xoogga lagu saaray hawlihii wacyi-gelinta, diiwaan-gelinta cod-bixiyaha, liisaskii cod-bixiyeyaasha, Kaarar qaybinta, soo gudbinta liisaska musharraxiinta goleyaasha deegaanka, ololaha Ururada Siyaasadda, Maalinta codeynta doorashada iyo heerarka kala duwan ee ku dhawaaqidda natiijada, kuraasta urur waliba ka helay xubnaha goleyaasha deegaanka saddexda degmo Qardho, Eyl iyo Ufayn ee doorashada hordhaca ah loo asteeyay. Sidoo kale warbixintani waxay soo koobaysaa Hawl-qabadyada qorshaysan, caqabadihii iyo casharadii laga bartay Doorashada Saddexda Degmo.

GKDPL wuxuu diyaariyay soona bandhigay Qorshihii Istiraatiijiyadeed ee 2019-2021 bishii December 2019. Istaraatiijiyadaas guud kadib guddigu waxa uu soo bandhigay warbixinta sanadlaha ah ee 2020 bishii January 2021 iyo jadwalka doorashada hordhaca ah ee degmooyinka doorashada hordhaca ah loo asteeyay. Wuxuu guddigu si guul leh xafiisyo uga furtay sagaalka Gobol ee Dawladda Puntland iyo Degmooyinka ay doorashada hordhaca ahi ka dhacday (Qardho, Eyl iyo Uffeyn). Wuxuu sidoo kale soo gabagabeeyay qorista shaqaalaha muhiimka ah ee xarunta dhexe iyo degmooyinka loo asteeyay doorashooyinka hordhaca ah.

GKDPL Waxa uu 21-27 Bisha janaayo, qiimeeyay soona calaamadeeyay goobahii diiwaan-gelinta iyo seejooyinkii cod-bixinta saddexda degmo ee doorashada hordhaca ah loo asteeyay. Kormeerkaas shaqo ka dib 13-kii bisha feebaraayo GKDPL ayaa ansixiyay oo shaaciyay goobaha loo asteeyay diiwaan-gelinta iyo seejooyinka doorashada saddexda degmo Qardho, Eyl iyo Ufayn. GKDPL waxuu si guul ah u hirgaliyay diiwaan-gelinta cod-bixiyaha ee ugu horaysay abid oo Puntland laga qabto taas oo loo isticmaalay qalabka ugu casrisan ee wax lagu diiwaan-geliyo (BVR), waxaana si hordhac ah looga diiwaan-geliyay saddexda degmo ee doorashada hordhaca ah loo asteeyay. Diiwaan-gelinta Cod-bixiyuhu waxay bilaabatay 16-kii may 2021 waxayna socotay mudo 17-maalmood ah, iyadoo wadadarta guud ee muwadaniinta is-diiwaan-geliyay ay ahaayeen 48,353 cod-bixiye. Waxaa 26- Agoosto Ilaa 09- sabteember 2021 lagu daabacay Kaararka cod-biyayaasha 3-da degmo xarunta dhexe ee GKDPL, iyadoo 20-Bishii 09, 2021 si siman looga wada bilaabay kaar qaybinta 3-da Degmo ee Qardho, Eyl iyo Ufayn. Waxaana kaararka cod-bixiyaha qaatay 37,738 cod-bixiye.

Markii la soo gudbiyay liiskii musharraxiinta ururada siyaasadda ka dib waxaa bilowday ololahi ururada oo socday 24 maalmood, waxaana 25-kii bisha Oktoobar 2021 ay bilaabmatay codayntu saacaddu markay ahayd 6:00am ee aroornimo guud ahaan 54-ta seejo ee 3-da degmo waxa ayna xirantay 6:00pm ee maqrib-nimo. Muddadaas waxaa goobaha ku sugnaa hawl-wadeenada doorashada, wakiilada ururada siyaasadda, korjoogtada maxaliga ah iyo saraakiisha amniga. Waxaa kale oo kormeer ku imaanayay madaxda ururada siyaasadda, korjoogtada maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah iyo xubnaha sare ee guddiga Doorashooyinka iyadoo tirada muwaadiniinta codaysay ay ahaayeen 28,854 cod-bixiye.

Doorashada saddexda degmo ee hordhaca ahi waxay ahayd mid jawi qorshaysan oo guul-leh ku qabsoontay, hase-ahaatee waxaa lagama maarmaan noqotay in la qeexo caqabadihii jiray guud ahaan doorashada, kuwaas oo isugu jira (i) wacyi-ga Bulshada oo hooseeyay (ii) Abaaro ba’an oo keenay in muwaadiniinta oo reer guuraa u badan ay ka hayaamaan goobihii laga diiwaan-geliyay xiligii kaarar qaybinta (iii) Doorashada Federaalka oo saamayn ku yeelatay



jadwalkeena doorasho (iv) Caabuqa Covid-19 oo naga hakiyay barnaamijyo qorshaysnaa (v) Dhaqaalaha oo yaraa ayaa hakad geliyay, dib-u-dhacna ku keenay hawl-qabadyo badan oo qorshaysnaa (vi) Astamaha Ururada Siyaasadda oo isku eg waxay keentay in codeeyayaashu kala saariwaayaan Ururada.

Maadaama doorashadaan hordhaca ah sababta loo asteeyay ay ahayd in laga dhaxlo casharro looga faa’iidaysto doorashada guud, casharraada laga bartayi waxay kala yihiin (i) Rabitaanka bulshada oo sarreeyay (ii) In wacyi-galinta iyo tababarida muwaadiniinta codeynaya ay tahay midda ugu muhiinsan ee lagu xaqiijin karo ka qaybgalka iyo hufnaanta hanaanka doorashada (iii) Dadka is-diiwaan-galiyay iyo dadka codeeyay oo in ka badan 50% haween ahaa halka in ka badan 70% ay dhalinyaro ahaayeen (iv) Celcelis ahaan maalintii waxaa is-diiwaan-geliyay >2800 taas oo u dhiganta 80% tirada laga filayay 3-da degmo (v) In loo baahan-yahay meelaha miyaga ah motooro koronto xilliyada diiwaan-gelinta iyo doorashada (vi) Dadka codeynaya oo 65% reer guuraa u badan, waa in loogu tala-galo kooxo wareega xilliyada diiwaan-gelinta, kaarar qaybinta iyo doorashada iyadoo lagu aadinayo hawl-galinadaan xilli roobeedyada (vii) In cod-bixiyayaasha Puntland ay u badan yihiin dad aan waxna qorin waxna akhrin sadaas darteed la dejiyo qorshe lagu caawinayo (viii) In lagu xaddido goobta cod-bixinta 800-1000 cod-bixiye.

Gabagabadii, Guddigu isagoo ka duulaya khibradihii iyo waayo-aragnimadii laga dhaxlay doorashadii hordhaca ahayd wuxuu qorsheeyay hirgelinta howlahan soo socda sannadka 2022: (i) Sii ballaarinta wacyi-gelinta muwaadiniinta iyo wax-baridda cod-bixiyayaasha (ii) Furista dhammaan xafiisyada degmooyinka ee guddiga (iii) Dhammaystirka soohdimaha deegaan doorashooyinka ee degmooyinka (iv) Sahminta, Qiimaynta iyo Shaacinta Seejooyinka doorashada iyo Goobaha Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha (v) Dib-u-eegista Xeerka Doorashooyinka G/deegaanka iyo horumarinta qaab dhismeedka siyaasadaha iyo habraacyada doorashada (vi) Keenista iyo Rakibaadda Qalabka Diiwaan-gelinta (vii) Bilaabidda iyo dhammaystirka hawsha diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha (viii) Daabacaadda iyo Qaybinta kaararka cod-bixiyayaasha (ix) Qabashada doorashooyinka guud ee golyaasha deegaanka (x) Abaabulka, kormeerka iyo ka warbixinta natiijooyinka doorashooyinka dawladaha hoose (xi) Shahaada siinta saddexda xisbi ee ku guulaysta doorashooyinka dawladaha hoose.



WARBIXIN-SANNADEEDKA 2021

1. XEERARKA IYO HABRAACYADA DOORASHOYINKA

Qabashada Doorasho kasta waxaa lagama maarmaan u ah inay jiraan Xeerarkii lagu lahaa hanaanka Doorashada. Guddiga Doorashada KMG ee Puntland waxa uu dib u eegis ku sameeyay, hubiyay isla-markaana dhammaystiray dhammaan xeerarkii looga baahnaa qabsoomidda doorashada Goleyaasha Deegaanka ee dagmooyinka. Guddigu waxa uu diyaariyay islamarkaana labada gole ee xukuumadda mariyay Sharciga Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha Puntland oo baarlamaanku ansixiyay 1-da maarso 2021.

Marka laga yimaado xeerarkaas, waxaa jira hagayaal, habraacyo, tusmooyin, hab-dhaqano iyo tilmaamo Afar iyo tobon ah (14) kuwaas oo GKDPL uu diyaariyay si ay u hagaan howlaha doorashooyinka, iyo sidii ay ugu diyaar garoobi lahaayeen doorashooyinka guud ee Dowladaha Hoose.

1. Habraaca xallinta khilaafaadka;
2. Hab-dhaqanka anshaxa ururada siyaasadda ee xilliga diiwaan-gelinta;
3. Hab-dhaqanka anshaxa ururada siyaasadda ee xilliga Doorashada;
4. Hab-dhaqanka anshaxa saxaafadda ee doorashada;
5. Hagaha Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha;
6. Hagaha kaarar qaybinta;
7. Hab-dhaqanka Anshaxa hawl-wadeenada iyo shaqaalaha GKDPL;
8. Habdhaqanka anshaxa korjoogtada maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah ee doorashada;
9. Habraaca ka qaybgalka haweenka iyo qaybaha nugul ee bulshada;
10. Tasmada ururada siyaasadda ee doorashada goleyaasha deegaanka;
11. Xeeridaamiyaha maamulka dhaqaalaha ururada siyaasadda;
12. Hab-dhaqanka ololaha ururada siyaasadda;
13. Tilmaamaha korjoogtada ee doorashooyinka goleyaasha deegaanka;
14. Tilmaamaha wakiilada ururada siyaasada ee doorashada goleyaasha deegaanka;



2. DOORASHADA DEGMOOYINKA HORDHACA AH

Doorashada goleyaasha deegaanka Puntland waxaa lagu daahfuray saddex degmo oo hordhac u ah degmooyinka kale kuwaas oo kala ah Qardho, Eyl iyo Ufayn. Waxaa la furay oo la qalabeeyay xafiisyada 3-da Degmo. Waxaa sidoo kale la qaatay Lana tababaray hawl-wadeenda muhiimka ah ee xarunta dhexe, gobollada iyo xafiisyada degmooyinka loo asteeyay Doorashooyinka hordhac ah.

2.1. Qalabka diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha

Guddigu waxa uu soo iibiyay qalabka diiwaan-gelinta cod-bixiyaha casriga ah (Biometric voter registration system) saddexda degmo oo dhan (60-kit) iyo seerfarkoodii (server) bishii Feebaraayo 2021.

Qalabka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha Casriga ah (Biometric Voter Registration System)		
Lam.	Nooca Qalabka	Faahfaahin
1.	Laabtoob (labtob),	Laabtoobka Waxaa lagu shubay software-ka la galinayay xogta muwaadinka laguna kaydiyay.
2.	Kaamiro (webcam)	Kaamiradda waxaa lagu qaadaa sawirka wajiga si looga hortago nuqul labanlaabeedka.
3.	lugaha kaamirada iyo laambadda (tripod and lamb)	Waa lugo sadex ah oo lagu ilaaliyo dhaqdhaqaaqa kaamiradda iyo layr ifiyo qofka xilliyada habaynkii ama meelaha mugdiga ah.
4.	Kaamirrada Indhaha ah (Iris camera)	Waa kaamirrad sawirta indhaha qof ka si looga hortago nuqul labanlaabeed ka.
5.	Daabace (Printer)	Waxaa lagu daabacaa shahaadada diiwaan-gelinta cod-bixiyaha.
6.	Cajalad kayd (Flash drive)	Waxaa lagu kaydiyaa xogta Diiwaan-gelinta marka la rabo in lagu kala wareejiyo labo laabtoob.
7.	Qaybiye (USB hub)	Waa qaybiye godod badan oo lagu xiro kaamirada, daabacaha, laambadda, kaamirada indhaha iyo falaashta.
8.	Sanduuqa Adag	Waa sanduuq adag oo ilaaliya qalabka laguna rido.

Keenista qalabka kadib waxaa lagu rakibay xarunta guddiga, waxaana lagu tababaray hawl-wadeenada waaxda tiknoolajiyadda iyo diiwaan-gelinta cod-bixiyaha. May 2021 waxaa la sameeyay diiwaan-gelinta tijaabada ah (mock registration) oo lagu diwaan galiyay 100 qof.



2.2. Sahminta Goobaha Diiwaan-gelinta iyo Seejooyinka Doorashada

21-27 janaayo, 2021 GKDPL waxa uu qiimayn iyo kormeer calaamadayn ah ku soo sameeyay goobaha diiwaan-gelinta iyo seejooyinka cod-bixinta saddexda degmo ee doorashada hordhaca ah loo asteeyay iyadoo 13-kii feebaraayo, 2021 uu guddigu shaaciyay goobaha loo asteeyay diiwaan-gelinta iyo seejooyinka doorashada saddexda degmo Qardho, Eyl iyo Ufayn.

Qardho		Eyl		Ufayn	
<u>G.Diiwaangelin</u>	<u>G.Codbixin</u>	<u>G.Diiwaangelin</u>	<u>G.Codbixin</u>	<u>G.Diiwaangelin</u>	<u>G.Codbixin</u>
1. Yaka Yaka	1.Qardho IDP Camp	1. Qarxis	1.Garadeen	1. Ufeyn	1.Sabankaab
2. Geri-Hel	2.Xaafada shinbiraale	2. Tuur	2.Daawad Wada-jir	2. Miirood	2.Balidoog
3. Jeded	3.Xaafada Calanley	3. Ceel-madoobe	3.Gabac	3. Moqor	3.Tasjiic
4. Adisoone	4.Xaafada Kaambo	4. Kabaal	4.Canjeel	4. Jeedaal	4.Geesaqabad
5. Cambaar Sare	5.Xingood Suuqa	5. Maraya	5.Af-tugweyne	5. Gumbulle	5.Kobdhexaad
6. Xudun Reer	6.Xaafada Xorgoble	6. Biyo-cade	6.Canbare	6. Doolacadalle	6.Dhoolacadalle
7. Carmo	7.Xaafada Gacan-libaax	7. Daawad	7.Diilin	7. Kob-dhexaad	7.Gumbulle
8. Dhaxan Karin	8.Xaafada Xingood	8. Badey	8.Xasbahale	8. Geesaqabad	8.Jeedaal
9. Qalwo	9.xaafada Qoryacad	9. Dhanaane	9.Dhiganle	9. Tasjiic	9.Moqor
10. Shire	10. Xaafada Kubo	10. Dhiganle	10.Dhanaane	10. Ballidoog	10. Miirood
11. Qardho IDP Camp	11. Qalwo	11. Xasbahale	11.Badey	11. Saban-kaab	11.X.L-barwaaqo
12. Kubo	12. Dhaxan-karin	12. Diilin	12.Daawad Bartamaha	12. Xaafada Degan	
13. Qoryacad	13. Libow	13. Cambare	13.Biyo-cade		
14. Xingood	14. Libaaxar	14. Af-tugweyne	14.Maraya		
15. Kaambo Gacanlibaax	15. Carmo	15. Canjeel	15.Kabaal		
16. Xergoble	16. Guudcad	16. Gabac	16.Ceel-madoobe		
17. Xingood- Suuqa	17. Xudun-reer	17. Garadeen	17.Tuur		
18. kaambo	18. Goda		18.Qarxis		
19. Calanlay	19. Cambaarsare				
20. Shimbiraale	20. Adisoone				
21. Libaaxar	21. Jeded				
22. Libow	22. Qormo				
23. Guudcad	23. Geri-hel				
	24. Yaka yaka				
	25. Shire				

2.3. Wacyi-galinta iyo tababarrada

Wacyi-galinta iyo wax-barista cod-bixiyaha ayaa marwalba GKDPL waxay u ahayd mudnaanta koobaad iyadoo lala-kaashaday Hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah waxaana loo isticmaalay qaybaha kala duwan warbaahinta sida TV-yada, idaacadaha, Baraha bulshada, Boorarka iyo tabeelooyinka magaaloyinka, fariimaha gaagaaban ee SMS-ka, isu-soobaxyo, dood-cilmiyeedyo lagu qabtay jaamacadaha, Iskuulada iyo fagaarayaasha magaaloyinka, degmooyinka iyo tuulooyinka.

Nooca wacyi-galinta iyo tababarrada	Tirada	Dadka la Gaaray
Shaneemooyinka wareega	18	4,500
Doorashada mac-malka ah	9	1,000
Riwaayadaha iyo fanka doorashada	10	5,000
Tababarrada safiirada wacyi-galinta ka qayb-galka bulshada	90	90,000
Fooramyada wacyi-galinta iyo wax-barista bulshada	15	4,500
Barnaamijyada Dhiirgalinta haweenka, dhalinyarada iyo Cod-bixiyeyaasha naafada ah	12	720
Fooramyada hoggaanada dhaqanka iyo Culimo-aw-diinka	6	300
Wacyi-galinta gawaaridda Wareega	18	30,000
Doodaha TV-yada ee Ururada Siyaasadda	3	30,000
Fariimaha wacyi-galinta, ogaysiisyada iyo waraysida Guddiga	50	200,000
Warbixinnada lagaarsiiyay bulshada iyadoo loo marayo baraha bulshada	1,000	2,000,000
Daabacaadaha Xogaha iyo Fariimaha Doorashooyinka	30,000	200,000



2.4. Tababarrada hawl-wadeenada diiwaan-gelinta cod-bixiyayaasha

271 hawl-wadeen ayaa lagu tababaray hanaanka diiwaan-gelinta cod-bixiyaha casriga ah (BVRS) oo isugujira (i) guddoomiyayaal goobeed (ii) waraysi-qaadayaal (iii) xog-galiyayaal (iv) odayo cadaaynayay dadka aan haysan aqoonsiyada shaqsi ee looga baahayahay.




2.5. Diiwaan-gelinta cod-bixiyaha

GKDPL waxa uu hirgaliyay diiwaan-gelinta cod-bixiyaha casriga ah (BVR-ka) oo ah tii ugu horeysay ee Puntland laga qabto, taas oo si hordhac ah looga diiwaan-geliyay saddexda degmo ee Qardho, Eyl iyo Ufayn. Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha waxaa laga daah-furay degmada Qardho 16-kii bisha May, Degmada Eyl waxaa laga bilaabay 19-kii bisha May halka Degmada Ufayn laga bilaabay 22-bisha May, 2021. Diiwaan-gelinta Cod-bixiyuhu waxay socotay 17 cisho degmo kasta.

2.6. Shaacinta Liiska cod-bixiyayaasha hordhaca ah

27-kii Bisha 6-aad 2021 guddigu waxa uu soo bandhigay xogta liiska hor-dhaca ah ee dadka iska diiwaan-geliyey guud ahaan 3-da degmo oo u dhacday sidan soo socota:-

LM	DEGMADA	WADARTA ISDIIWAAN-GELISAY	Wadarta Ansaxday	Nuqulada Labanlaabka ah	Wadarta aan dhammaystirmin
1)	Qardho	26,285	24,921	1,011	353
2)	Eyl	11,837	11,364	273	200
3)	Ufayn	10,231	9,902	216	113
4)	Wadarta Guud	48,353	46,187	1,500	666






2.7. Shaacinta liiska cod-bixiyayaasha Rasmiga ah

Markii uu soo idlaaday waqtiga xalinta cabashooyinka loo asteeyay ee ay shaqaynayaan guddiga xalinta cabashooyinka diiwaan-gelinta cod-bixiyaha, guddigu wuxuu 04-08-2021 shaaciyey xogta liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha degmooyinka Qardho, Eyl iyo Ufayn. Wuxuuna u shaaciyey sidan soo socota:-

Lm	Degmada	Wadarta Guud	Wadarta Ansaxday	Nuqulada Labanlaabka Ah	Wadarta Aan Dhammaystirmin
1)	Qardho	26,285	25,405	207	673
2)	Eyl	11,837	11,470	78	289
3)	Ufayn	10,231	9,964	95	172
4)	Wadarta Guud	48,353	46,839	380	1,134



2.8. Daabacaadda iyo qaybinta kaararka cod-bixiyayaasha




GKDPL wuxuu 20-bisha Agoosto 2021 diyaariyey agabkii lagu daabici lahaa kaararka cod-bixiyayaasha iyadoo muddo 15 maalmood ah oo ka bilaabmaysa 26- Agoosto Ilaa 09- sabteember 2021 lagu daabacay Kaararka cod-biyayaasha 3-da degmo xarunta dhexe ee GKDPL.

20-Bishii 09, 2021 waxaa si siman looga wada bilaabay kaar qaybinta 3-da Degmo ee Qardho, Eyl iyo Ufayn iyadoo loo kala qorsheeyey 3 waji (Phases) oo u kala qabsoomay sidan soo socota:-

- ⇒ Wajiga 1-aad 20- September ilaa 27- September (waxaa laga qaybiyey dhammaan seejooyinka Cod-bixinta)
- ⇒ Wajiga 2-aad 28- Sebteember ilaa 11- Oktoobar (waxaa laga qaybiyay Xarumaha Degmooyinka)
- ⇒ Wajiga 3-aad 12-Oktoobar ilaa 18 Oktoobar (kooxaha wareega ayaa ka qaybiyey tuulooyinka iyo miyiga fog-fog ee Degmooyinka)

Kaararka guud ee laga qaybiyey 3-da degmo waxay kala ahayeen:-

LM	DEGMADA	KAARARKA LA DAABACAY	KAARARKA LA QAATAY	KAARARKA HARAY
1.	Qardho	25,405	20,620	4,785
2.	Eyl	11,470	8,671	2,799
3.	Ufayn	9,964	8,287	1,677
4.	WADARTA GUUD	46,839	37,578	9,261





2.9. Liisaska musharixiinta degmooyinka


11-kii bisha September, 2021 GDPL waxa uu shaaciyay ururada siyaasada ee soo gudbiyay liiska musharixiinta golaha deegaanka ee degmooyinka Qardho, Eyl iyo Ufayn.

URURADA SOO GUDBIYAY LIISKA MUSHARAXIINTA		
Qardho	Eyl	Ufayn
1. URUR SIYAASADEEDKA RUN IYO CADAALAD	1. URUR SIYAASADEEDKA RUN IYO CADAALAD	1. URUR SIYAASADEEDKA RUN IYO CADAALAD
2. URUR SIYAASADEEDKA SHAQAALAHA XOOGSATADA AH	2. URUR SIYAASADEEDKA SHAQAALAHA XOOGSATADA AH	2. URUR SIYAASADEEDKA SHAQAALAHA XOOGSATADA AH
3. URUR SIYAASADEEDKA CADAALADDA IYO SINNAANTA	3. URUR SIYAASADEEDKA CADAALADDA IYO SINNAANTA	3. URUR SIYAASADEEDKA CADAALADDA IYO SINNAANTA
4. URUR SIYAASADEEDKA KAAH	4. URUR SIYAASADEEDKA KAAH	4. URUR SIYAASADEEDKA KAAH
5. URUR SIYAASADEEDKA MIDEEYE	5. URUR SIYAASADEEDKA MIDEEYE	5. URUR SIYAASADEEDKA MIDEEYE
6. URUR SIYAASADEEDKA HORSEED	6. URUR SIYAASADEEDKA MUSTAQBAL	6. URUR SIYAASADEEDKA MUSTAQBAL
7. URUR SIYAASADEEDKA IFIYE	7. URUR SIYAASADEEDKA HORSEED	7. URUR SIYAASADEEDKA HORSEED
	8. URUR SIYAASADEEDKA IFIYE	8. URUR SIYAASADEEDKA IFIYE


Mudo 11 Maalmood ah oo laga shaqaynayay kala shaandhaynta liisaska musharixiinta u tartamaya goleyaasha degmooyinka oo ay ururadu soo gudbiyeen ka dib, 23-kii bisha Septeember 2021 ayaa uu GKDPL shaaciyay liiska musharixiinta saddexda degmo ee Qardho, Eyl iyo Ufayn;

Lam	degmada	Tirada	Jinsiga		Heerka wax-barashada			Da'da			
			lab	dhedig	D/Hoose	D/Sare	Jaamacad	25-34	35-44	45-54	>55
1	Qardho	165	112(68%)	53(32%)	24(15%)	56(34%)	85(51%)	111(67%)	34(21%)	14(8%)	6(4%)
2	Eyl	172	123(72%)	49(28%)	46(27%)	80(46%)	46(27%)	81(47%)	33(19%)	40(23%)	18(11%)
3	Ufayn	162	117(72%)	45(28%)	34(21%)	55(34%)	73(45%)	113(70%)	28(17%)	13(8%)	8(5%)
Wadarta Guud		499	352	147	104	191	204	305	95	67	32


Jinsiga 3-da Degmo



Heerka Aqoonta



Da'da





2.10. Ololaha doorashada

Guddiga Doorashooyinka waxa uu diyaariyay soona saaray shaxda isu-soo baxyada iyo dhoolo tusyada qorshaysan ee ururrada iyo mudada ololaha doorashada, kaas oo loogu qoondeeyay tiro maalmo ah oo isle'eg sida uu qeexayo Qodobka 23aad ee Xeerka Doorashada Goleyaasha deegaanka.

Ololaha Doorashadu waxa uu socday mudo 24 maalmood ah oo ka bilaamanaysa 26-kii bisha 9aad 2021 waxa uuna dhammaaday 22-kii bisha 10aad 2021. Guddigu waxa uu si joogta ah u kormeerayay habsami u socodka ololaha doorashada iyadoo ganaaxyo lagu fuliyay ururadii jabiyay anshaxa nidaamka ololaha ururada siyaasadda sida uu qabo xeerka doorashada qodobka 22aad iyo 23aad iyo jadwalka guddigu u dajiyay ololaha ururada. Shaxdan waxaa loo kala helay qaab qori tuur ah.

SHAXDA OLOLAHA URURADA SIYAASADDA PUNTLAND

Maalinta	Urur Siyaasadeedka	Maalinta	Taariikh
Ololaha Koowaad			
Maalinta 1	Horseed	Axad	26/09/2021
Maalinta 2	Kaah	Isniin	27/09/2021
Maalinta 3	Shaqaalaha	Talaado	28/09/2021
Maalinta 4	Mustaqbal	Arbaco	29/09/2021
Maalinta 5	Cadaalad iyo Sinaan	Khamiis	30/10/2021
Maalinta 6	Ifiye	Sabti	02/10/2021
Maalinta 7	RunCad	Axad	03/10/2021
Maalinta 8	Mideeye	Isniin	04/10/2021
Ololah a Labaad			
Maalinta 9	Cadaalad iyo sinaan	Talaado	05/10/2021
Maalinta 10	Mustaqbal	Arbaco	06/10/2021
Maalinta 11	Kaah	Khamiis	07/10/2021
Maalinta 12	Shaqaalaha	Sabti	09/10/2021
Maalinta 13	Horseed	Axad	10/10/2021
Maalinta 14	Mideeye	Isniin	11/10/2021
Maalinta 15	Ifiye	Talaado	12/10/2021
Maalinta 16	RunCad	Arbaco	13/10/2021
Ololaha Sadexaad			
Maalinta 17	Shaqaalaha	Khamiis	14/10/2021
Maalinta 18	Mustaqbal	Sabti	16/10/2021
Maalinta 19	Horseed	Axad	17/10/2021
Maalinta 20	RunCad	Isniin	18/10/2021
Maalinta 21	Cadaalad iyo Sinaan	Talaado	19/10/2021
Maalinta 22	Mideeye	Arbaco	20/10/2021
Maalinta 23	Ifiye	Khamiis	21/10/2021
Maalinta 24	Kaah	Jimce	22/10/2021



2.11. Diyaar-garowga guud ee maalinta codeynta

Guddigu waxa uu 15-kii bisha oktoobar, 2021 ka hor diyaariyay dhammaan agabkii lagu shaqayn lahaa maalinta doorashada ee 54-ta seejo iyaga oo lagu lingaxay sanaadiiqda codaynta oo kiiba ay ku jireen 48 shay oo isugu jira agabka xasaasiga ah sida waraaqaha cod-bixinta, shaabadda goobta, lingaxyada, buuga diiwaanka goobta IWM iyo agabka aan xasaasiga ahayn sida qalabka xafiiska, foomamka, buugaagta IWM.

Agabka Materials		Tirada	Halb
A. Agabka Xasaasigaa	A. Sensitive Materials		
1.Sanduuga agabka	<i>Ballot Box</i>	1-4	Piece
2.Waraaqaha cod-bixinta	<i>Ballot Papers</i>	1-4	Box
3.Lingaxyo	<i>Security Seals</i>	30-120	Piece
4.Shaabadda goobta	<i>Polline station stann</i>	1/2	Piece
5.Khadka aan la arkayn/go'in	<i>Invisible Ink</i>	10/0	Bottle
6. Khadka buluuga ah	<i>Visible Ink</i>	3/1	Bottle
7.Buuga Cod-bixivevaasha	<i>Voter book</i>	2/1	piece
8.Foomka wareeinta agabka (Form 3)	<i>Tracking & handover form</i>	2-4	Piece
9.Buqshadda aan furmin	<i>Temper proof envelope</i>	8/5	piece
B. Agabka kale	B. Equipment		
10.Beteri	<i>Batteries AA</i>	4/8	Piece
11.Tooshka khadka	<i>Flourescent torch</i>	1/2	Piece
12.Daaha codeynta	<i>Screens</i>	4	Piece
13.Xariga	<i>Nylon string</i>	4	Piece
14.Biimanka waraaqaha	<i>Bulldog clips</i>	15	Piece
15.Suuf/cudbi	<i>Tissue</i>	2	Packet
16.Bacaha jilicsan	<i>Plastic bags</i>	4	Piece
C. Qalabka Xafiiska	C. Office Equipment		
17. Khadka shaabada	<i>Stann ink</i>	3/2	Piece
18.Laambada gacanta	<i>Rechargeable lambs</i>	1	piece
19.qaybisada Korontada	<i>Power extension cable</i>	1	Piece
20.Cagta shaabada	<i>Stamp pad</i>	1/2	Piece
21.Kaalkulator	<i>Calculator</i>	1	Piece
22.Buqshada	<i>Envelopes</i>	10/5	Piece
23.Qaalimaan	<i>Pens (blue biro)</i>	1	box
24.Ciniir/laastig	<i>Rubber bands</i>	2	Packet
25.Mastarad	<i>Ruler</i>	1	Piece
26.Maqas	<i>Scissors</i>	1	Piece
27.Sharooti	<i>Tyne maskine</i>	2	piece
28.Galoofiska gacmaha	<i>Gloves</i>	1	Box
29.Gafuur xirka	<i>Face masks</i>	1	Box
30.Nadiifiye	<i>Sanitizers</i>	1	piece
D. Foomka / Buugga	D. Forms / Books		
31.Hagaha korjoogayaasha	<i>Guidelines for observers</i>	1	Piece
32.Tilmamaha wakiilada	<i>Guidelines for PA agents</i>	1	Piece
33.Buugga habraaca goobta	<i>Polling station procedures</i>	1	Piece
34.Tixraaca fudud ee goobta	<i>Quick reference guideline</i>	1	Piece
35.Boorarka- sida loo calaaminayo	<i>Poster-How to mark your</i>	2	Piece
36.Tilmaamaha Xirxirida	<i>Packing instructions</i>	1	Piece
37.Boorarka- talaabooyinka cod-bixinta	<i>Poster-Steps in voting</i>	3	Piece
38.Liistada musharaxiinta ururada siyaasada	<i>PA candidate list</i>	3	Piece
39.Xeerka doorashada	<i>Electoral Law</i>	1	Book
40.Buugga dhacdooyinka goobta	<i>Field record book</i>	1	Book
41.tilmaamaha dadka caawimaada u baahan	<i>Poster Special need people</i>	2	
42.Buugga diiwaanka goobta	<i>Polling station record book</i>	1	Book
43.Liista hubinta agabka	<i>PS inventory list</i>	1	Piece
44.Foomka Cabashada	<i>Complaint form</i>	150/50	piece
45.Waraaqo A4	<i>A4 papers</i>	50/100	piece
46.qalin koobi	<i>Marker pen</i>	2	piece
47.Qalinka Dhaga	<i>Stable pen</i>	1	piece
48.masaabiir	<i>Nails</i>	10	piece



Gaadiidka doorashada loo diyaariyay waxay isugu jireen gawaari xamuul ah oo lagu daabulay agabka doorashada iyo gaadiidka laanguruusarada ah oo lagu daabulay shaqaalaha 54-ta seejo.

Guddigu waxa uu 15-kii ilaa 18-kii Oktoobar, 2021 qiimayn iyo dib u habayn ku sameeyay Seejooyinka cod-bixinta iyada oo goobaha aan korontada lahayn loo diyaariyay matooro iyo laambado lagu shaqeeyo hadii shaqadu ay habayn gasho. Waxaa kale oo seejooyinka loo dhammaystiray agabka ay u baahnaayeen.

Waxaa tababar isugu jira soojeedin (presentations) iyo Doorasho tijaabo ah (Mock election) loo sameeyay 724 hawl-wadeen oo isugu jiray (i) Gudoomiyeyaashii seejooyinka (ii) Xoghayeyaal (iii) Hubiyeyaal (iv) safaf nidaamiyeyaal iyo (v) wakiilada ururada siyaasadda. Waxaa si lamida tababar loo qabtay saraakiisha amniga doorashada.

2.12. Maalinta cod-bixinta

Taariikhdu markay ahayd 25-kii October, 2021 6:00am aroornimadii waxaa guud ahaan 54-seejo ee 3-da degmo ka bilaabatay codeynta, waxa ayna xirantay 6:00pm maqribnamadii iyada oo sida uu xeerka doorashadu qabo tixgalin la siiyay dadka safafka ku jiray marka ay saacadu gaartay wakhtiga xiridda safkana gadaal looga xiray si aanay cid kale ugu soo biirin. Xilligaa waxaa goobaha ku sugnaa hawl-wadeenada doorashada, wakiilada ururada siyaasadda, korjoogtada maxaliga ah iyo saraakiisha amniga. Waxaa kale oo kormeer ku imaanayay madaxda ururada siyaasadda, korjoogtada maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah iyo xubnaha sare ee guddiga Doorashooyinka. Waxaa sidoo kale tixgalin gooni ah la siiyay dadka nugul oo isugujira waayeelka, naafada, hooyooyinka uurka leh, dadka xanuunsan iyo dadka aan waxna qorin waxna akhrin.

2.13. Tirinta codadka iyo ku dhawaaqidda natiijada

Tirinta codadku waxa ay ka bilaabatay goob-kasta markii cod-bixintu dhammaatay. Xaqiijinta iyo ku dhawaaqidda natiijadu waxa ay martay afar heer oo kala ah;

1. Ku dhawaaqidda natiijada hordhaca ah ee Goobta cod-xinta GKDPL.
2. Ku dhawaaqidda natiijada hordhaca ah ee Xafiiska Degmada ee GKDPL
3. Ansixinta natiijada hordhaca ah GKDPL
4. Ku dhawaaqidda Natiijada Kama danbaysta ah ee maxkamada sare.



“Codkaagu Waa Xaqaaqa, Codkaagu Waa Mustaqbalkaaga”

(I) 25-ka ilaa 26-ka Oktoober, 2021 Ku dhawaaqidda natiijada hordhaca ah ee seejooyinka Qardho, Eyl iyo Ufayn oo u dhacday sida ku xusan shax-da hoose;

Results of Qardho Polling stations				Results of Eyl Polling stations				Results of Ufayn Polling stations			
